

(WC Factsheet- Somali-9-18-2007)

Is-bahaysiga NH ee Ammaanka Shaqada iyo Caafimaadka

Magdhawga shaqaalaha

Faa'iidooyinka (xaqa) Caafimaadka iyo Curyaanimada ee Shaqaalaha ay Waxyeeladu Soo-gaadho

Haddii ay sababo shaqdaada la-xidhiidha awgood ay waxyeelo ku-soo-gaadho, maghawga shaqaaluhu (ama “worker’s comp”) waxay bixinaysaa kharashka caafimaadka. Waxaa kale oo ay bixinaysaa 60% gunnada kaa baaqatay, haddii aad shaqadaada ka-maqnayd in ka-badan saddex maalmood. Magdhawga shaqaaluhu waa nooc caymiska ka mid ah oo dhammaan loo-shaqeeyayaasha WAAJIB ku ah in ay shaqaalahooda siiyaan.

“Worker’s comp” waxay u faa'iidaysaa shaqaalaha oo dhan
Cid-kastiba khaladka ha lahaate, shaqaalaha waqtiga dheeraadka ah, kuwa ku-meelgaadhka ah iyo kuwa socotada ah, xilliyada intooda badan magdhawga way helayaan. Shaqaalaha aan dukumantiga haysan xaqbay u leeyihiin magdhawiyada shaqaalaha intooda badan.

Soo-gudbinta Waxyeelooyinka

Haddii adiga oo goobtaada shaqada jooga ay waxyeelo ku-soo-gaadho, shaqaaleeyahaaga u sheeg. Waxaad buuxisaa warbixinta shilka (fooka 8aWCA). Waxaad foomkan ka heli kartaa shaqaaleeyahaaga. Waxaad hubisaa in aad hal nuqul oo foomkan ah la hadhay. Waxaad waxyeelooyinka iyo xanuunka goobta shaqada kaa soo-gaadha aad warbixintiisa soo-gudbin kartaa muddo illa laba sano gudahood ah, laakiin waxaa ugu fiican in aad isla-markaaba soo-gudbisid.

U-tagidda Dhakhtarka

Haddii ay waxyeelo ku-soo-gaadho adiga oo goobtaada shaqada jooga, waxaad xaq u-leedahay in aad dooratid dhakhtarka aad u tagaysid. Waxaa kale so aad xaq u-leedahay in aad fikir labaad heshid. Xilliyada intooda badan waxaad dooran kartaa dhakhtar-welba.

Marka ay tahay “xannaanada la maareeyay” ee magdhawga shaqaalaha, waxaa waajib kugu ah in aad ka dhex dooratid liiska dhakhaatiirta.

Haddii ay xaaladdaadu tahay mid shaqada la-xidhiidha, waxaad hubisaa in aad arrintaa u sheegtay dhakhtarkaaga, cusbitaalka ama shaqaalaha kale ee caafimaadka.

Markaa waa in dhammaan biilasha kharashka caafimaadka ay u diraan cidda ku-shaqaalaysay, ee adiga in ay kuu soo-diraan ma'aha.

Haddii waxyeelada ama xanuunka ku-soo-gaadhay uu shaqadaada kaaga yimid, waxaad hubisaa in dhakhtaarkaagu uu warbixintaa gudbiyay. Waxaad hubisaa in uu dhakhtarkaagu uu xaaladdada si sax ah u qeexay. Warbixinta dhakhtarku waa in ay sheegtaa in aad shaqadaadii horee ku-noqonkaraysid iyo in kale iyo haddii uu jiro wax xad ah oo tilmaamaya waxaad qaban karaysid. Xogtaas gaadhsii aqaaleeyahaaga. Shaqaaleeyahaaguna wuxuu ku-qasbanyahay in uu qaato amarka dhakhtarka.

Ku-soo-noqoshada shaqada

Waxaad hubisaa in aad dhakhtarkaaga ka qaadatay foomka 75WCA-1 oo sheegaya in aad shaqadaada ku-noqon karaysid iyo in kale iyo haddii ay xadaysanyihiin waxyaalaha aad qaban karaysid. Hal nuqul shaqaaleeyahaaga sii, hal nuqulna adigu la hadh. Shaqaaleeyahaagu wuxuu ku qasbanyahay in uu awaamiirta dhakhtarka u hoggaansanaado.

Haddii Sheegashadaada La Diio

Haddii kuwa bixiya magdhawga shaqaalaha ay sheegashadaada diidaan ha raja gooynin. Shirkadaha caymiska qaarkood, si ay kuu niyad jabiyaan, marka hore way ku diidaan. Waa in diidmadaas aad rafcaan ka qaadatid oo aad ugudbisid Waaxda Shaqada ee NH. Illaa kala-badh dhammaan shaqaalaha Waaxda Rafcaanka u soo-gudbisa way ku guulaystaan. Waxaad haysata waqti dhan 18 bilood oo aad rafcaanka diidamada aad ugudbisan karaysid marka laga bilaabo xilligii lagu diiday.

Helitaanka Caawimaad Sharciyeed

Haddii aad taageero qareen u baahatid, waxaad raadsataa mid ku takhasuusay magdhawga shaqaalaha. Kuma qasbanid in aad lacagta sii qadintid. Qareenku haddii uu ku guulaysto rafcaanka, waxaa la siinayaa 20% faa'iidooyinka curyaanimada ee aan la bixin. Haddii aad rafcaanka ku guulaysan waydid waxba bixinmaysid.

Taageero Lega helayo waaxda shawada ee NH

Si aad xog dheeraad ah u heshid ama caawimaad, waxaad wacdaa Waaxda Shaqada ee New Hampshire, taleefonka 271-3176. Waxaadnad waaxda waydiisaa sheegashadaada magdhawga shaqaalaha. Ama waxaad aaddaa websitka <http://www.labor.sate.nh.us/>